# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMALIYA

الجمهورية الصومال الدمقراطية

Sannadka 10aad Muqdisho, 1da Juun 19882 L. 6

FAAHFAAHIN BIL SOO BAXA جريده شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

QIIMADU waa 5 Shiln lambar waliba—RUKUNKA: Sannadii waa Shs. 100 Somaliya gudaheeda—dibaddeedana waa Shs. 300. Ruknka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janayo Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxoo ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanka waxaa a weydiistaa laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah—lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

## K O O B N I I N

### QAYBTA KOOWAAD
### SHARCI

SHARCI L.16 ee 13 Maajo 82, Oggolaansho Heshiis dhexmaray JDS iyo Dawladda Imaaraadka Carabta Midoobay kuna saabsan Iskaashi xagga Qaanuunka iyo Garsoorka. Bogga 467

SHARCI L.17 ee 16 Maajo 82, Oggolaansho Heshiis dhexmaray JDS iyo Sanduuqa Kuweyd ee Horumarinta Dhaqaalaha Carabta, kuna saabsan Mashruuca kordhinta xagga Korontada Muqdisho. » 468

SHARCI L. 18, 26 Maajo 82, Heshiis dhexmaray JDS iyo Sanduuqa Carabta ee Horumarinta Dhaqaalaha iyo Bulshada kuna saabsan Maalgelinta Mashruuca Biyaha Xamar ee Marxaladda Labaad. » 469

SHARCI L. 19 ee 26 Maajo 1982, Xuquuqda Dadka Ciidamada Qalabka Sida ka tirsan ee la wareejiyey. » 470

SHARCI L. 20, ee 26 Maajo 1982, U rog d Sharci Xeer Sharci Lamb. 3 ee 29.4.82, kuna saabsan Dhismaha Wasaaradda H. Dooxada Jubba. » 471

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS, Lamb. 32 ee 13 Maajo 1982, Meel marin Heshiiiis ka dhexmaray JDS iyo Dawladda Imaaraadka Carabta Midoobay, kuna saabsan Iskaashiga Xagga Qaanuunka iyo Garsoorka. » 472

مرسوم رئيس ج.د.ص. رقم ٣٢ بتاريخ ١٣ مايو ١٩٨٢
التصديق على اتفاق التعاون القانونى والقضائى بين دولة
الامارات العربية المتحدة وجمهورية الصومال الديمقراطية .

XEER MADAXWEYNAHA JDS, Lamb. 33 ee 26 Maajo 1982, Meel marin Heshiis dhexmaray JDS iyo Sanduuqa Kuweyt ee H. Dhaqaalaha Carabta, kuna saabsan Mashruuca Kordhinta xoogga Korontada Muqdisho. » 474

مرسوم رئيس الجمهورية رقم ٣٣ بتاريخ ٢٦ مايو ١٩٨٢،
التصديق على اتفاقية قرض بين جمهورية الصومال
الديمقراطية وصندوق الكويت للتنمية الاقتصادية العربية
للمساهمة فى تمويل مشروع زيادة الطاقة الكهربائية فى مقديشو

XEER MADAXWEYNAHA JDS, Lamb. 34 ee 18 Maajo 1982, Billad Maar ah oo Hawlkarnimo lagu Maamuusay J/le Dr. Aadan Guuleed SHABEEL & J.le XASAN IBR/M ABYAN. » 476

XEER MADAXWEYNAHA JDS, Lamb. 35 ee 26 Maajo 1982, Meel marin Heshiiska dhexmaray JDS iyo Sanduuqa Carabta ee H. Dhaqaalaha iyo Bulshada, kuna saabsan maalgelinta Mashruuca Biyaha Xamar ee Marxaladda labaad » 477

مرسوم رئيس ج.ص.د. رقم ٣٥ بتاريخ ٢٦ مايو ١٩٨٢
التصديق على اتفاقية قرض بين جمهورية الصومال الديمقراطية
والصندوق للانماء الاقتصادى والاجتماعى للمساهمة فى
تمويل مشروع مياه مقديشو الثانى .
رئيس الجمهورية

QAYBTA SADDEXAAD
TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH.

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 29.5.82, Lumid Bug Keyd L. 16680 ku qoran Faadumo Xaaji Cabdulqaadir 479 «

QAYBTA KOOWAAD

SHARCI

Sharci Lambar 16 taariikh 13 Maajo 1982 Oggolaansho Heshiis dhexmaray JDS, iyo Dawladda Imaaraadka Carabta Midoobay kuna saabsan Iskaashi xagga qaanuunka iyo Garsoorka.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:-

(Qod. 1aad)

1. Waxaa la oggolaaday Meel marinta Heshiiska dhexmaray JDS, iyo Dawladda Imaaraadka Carabta Midoobay kuna saabsan Iskaashiga xagga Qaanuunka iyo Garsoorka.
2. Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday Magaalada Abu-dabay taariikhdu markey ahayd 3 Maajo 1981.
3. Heshiisku wuxuu ka mid yahay Sharcigan isagoo Lifaaq u ah.

(Qod. 2aad)

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan Qodobada Heshiiska ku tilmaaman Qod. 1aad ee Sharcigan waxay leeyihiin jiimo iyo staan Sharci la heer ah Sharciyada iyo Xeerarka Dalka, waxaana dhaqan gelintooda la waaajinayaa Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraatiga Soomaaliya iyo Heshiiska.

(Qod. 3aad)

Madaxweynaha JDS. waxaa awood loo siiyay inuu meel mariyo Heshiiska Sharcigan lagu tilmaamay.

(Qod. 4aad)

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 23 Mag. 1982

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci Lambar 17 taariikh 26 Maajo 1982, Oggolaansho Heshiis dhex maray JDS iyo Sanduuqa Kuweyt ee Horumarinta Dhaqaalaha Carabta, kuna saabsan Mashruuca Kordhinta xoogga Korontada Muqdisho.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:-

(Qod. 1aad)

1. Waxaa la oggolaaday meelmarinta Heshiiska dhex maray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Sanduuqa Kuweyd ee Horumarinta Dhaqaale ha Carabta, kuna saabsan Amaah Lacageed oo dhan 10 500.000 ah Diinaarka Kuweyd oo loogu talo galay Mashruuca Kordhinta xagga Korontada Xamar.
2. Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday magaalada Kuweyt, taariikhdu markay ahayd 8.3.1982.
3. Heshiisku waxuu ka mid yahay Sharcigan isagoo Lifaaq u ah.

(Qod. 2aad)

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan qodobbada Heshiiska ku tilmaaman Qod. 1aad ee Sharcigan waxay leeyihiin qiimo iyo astaan Sharci la heer ah Sharciyada iyo Xeerarka Dalka, waxaana dhaqangelintooda la waafajinayaa Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Heshiiska.

(Qod. 3aad)

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxaa awood loo siiyey inuu meelmariyo Heshiiska Sharcigan lag utilmaamay.

(Qod. 4aad)

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 26 Mag. 1982

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci Lambar 18 taariikh 26 Maajo 1982, Heshiis dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Sanduuqa Carabta ee Horumarinta Dhaqaale iyo Bulshada, kuna saabsan maalgelinta Mashruuca Biyaha Xamar ee Marxaladda Labaad.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELIYEY: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:-

(Qod. 1aad)

1. Waxaa la oggolaaday meel marinta Heshiiska dhex maray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Sanduuqa Carabta ee Horumarinta Dhaqaalaha iyo Bulshada, kuna saabsan Amaah Lacageed oo dhan 5.000.000 ah Kuweyt Diinaar, looguna talo galay Maalgelinta Mashruuca Biyaha Xamar ee Marxaladda Labaad.
2. Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday Magaalada Kuweyt, taariikhdu markay ahayd 26.12.1981.
3. Heshiisku wuxuu ka mid yahay Sharcigan isagoo Lifaaq u ah.

(Qod. 2aad)

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan qodobada Heshiiska ku tilmaaman qod. 1aad ee Sharcigan waxay leeyihiin qiimo iyo astaan Sharci la heer ah Sharciyada iyo Xeerarka Dalka, waxaana dhaqangelintooda la waafajinayaa Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Heshiiska.

(Qod. 3aad)

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxaa awood loo siiyey inuu meel mariyo Heshiiska Sharcigan lagu tilmaamay.

(Qod. 4aad)

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho 26 Mag 1982

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci Lambar 19 taariikh 1982, Xuquuqda Dalka Ciidamada Qalabka Sida ka tirsan ee la wareejiyey.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELIYEY: Oggolaanshaha Gudciga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharcigan soo socda:-

(Qod. 1aad)

Dadka la wareejiyay, kana tirsan Ciidamada Qalabka Sida, oo loo wareejiyey Wasaaradaha ama hay'adaha kale ee Qaranka, hawshoodu waa xiriir, muddadii ay hore u soo Shaqeeyeenna waxaa la raacinayaa inta dambe oo ay shaqada Qaranka hayeen.

(Qod. 2aad)

Laga billaabo taariikhda wareejinta, Xubnaha Ciidamada Qalabka Sida ee la wareejiyey waxay ka mid noqonayaan Shaqaalaha Qaranka ee Rayidka ah, waxaana lagu dhaqayaa Shuruucda iyo Xeerarka u degsan Hay'adaha lagu wareejiyey.

(Qod. 3aad)

1. La'wareejiyeyaasha kor ku tilmaaman waxay xuquuqdooda hawlgabka, Liiltirka iyo dhaawaca shaqo ku yeelanayaan Wasaaradda Maaliyadda ama Hay'adaha kale oo ay ku wareegeen.
2. Ciidamada Qaabka Sida, waxay u soo gudbinayaan Wasaaradda Maaliyadda ama Hay'adaha kale Lacagihii loo qoondeeyey xuquuqda hawlgabka, liiltirka iyo Dhaawaca Shaqada ee la wareejiyaha.

(Qod. 4aad)

Waxaa la baabi'iyay Sharci kasta oo ka hor imaanaya ama aan la socon karin Sharcigan.

(Qod. 5aad)

Sharcigan dhaqangalkiisu wuxuu ka billaabanayaa 1da Jennaayo 1976, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 26 Mag. 1982

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci Lambar 20 taariikh 26 Maajo 1982, U rogid Sharci Xeer Sharci L. 3 ee 29.4.1982, kuna saabsan Dhismaha Wasaaradda Horumarinta Dooxada Jubba.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharcigan soo socda:-

(Qod. 1aad)

Waxaa loo rogay Sharci, Xeer Sharci Lamb. 3 ee 29.4.1982, oo ku saabsan Dhismaha Wasaaradda Horumarinta Dooxada Jubba.

(Qod. 2aad)

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho,26 Mag. 1982

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

## XEER

Xeerka Madaxweynaha JDS, Labmar 32 taariikh 26 Maajo 1982 meel marin Heshiiska dhexmaray JDS, iyo Dawladda Imaaraadka Carabta Midoobay, kuna saabsan Iskaashiga Xagga Qaanuunka iyo Garsoorka.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 67aad, Xubintiisa 5aad iyo Qod. 82aad, Xubintiisa 4aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga Tirsigiisu yahay, taariikh, ee Golaha Shacbigu ku oggolaaday Heshiiska ujeedada ku qoran;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in Heshiiska la meelmariyo.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la meel mariyay Heshiiska dhexmaray JDS, iyo Dawladda Imaaraadka Carabta Midoobay, kuna saabsan Iskaashi xagba Qaanuunka iyo Garsoorka, laguna kala saxiixday magaalada Abu-dabay taariikhdu markay ahayd 3dii Maajo 1981.

(Qod. 2aad)

Heshiiskan wuxuu ku yeelanayaa JDS, astaan Sharci ah, wuxuu dhaqan gelayaa marka la is dhaafsado Waraaqaha meel marinta.

(Qod 3aad)

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 13 Mag. 1982

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

مرسوم رئيس الجمهورية رقم ٣٢ بتاريخ ١٣ مايو ١٩٨٢
التصديق على اتفاق التعاون القانونى والقضائى بين دولة الامارات العربية المتحدة وجمهورية الصومال الديمقراطية.

رئيس الجمهورية

بعد الاطلاع على الفقرة الخامسة من المادة ٦٧ والفقرة الرابعة من من المادة ٨٢ من الدستور .

وعلى القانون رقم بتاريخ ١٦ والذى بموجبه وافق مجلس الشعب على الاتفاقية المذكورة اعلاه .

ونظرا للضرورة الداعية الى التصديق على الاتفاقية السالفة الذكر.

يرسم

بما هى آت :

المادة الاولى

تم التصديق على اتفاقية التعاون القانونى والقضائى فى المواد المدنية والتجارية ومواد الاحوال الشخصيه والمواد الجزائية بين دولة الامارأت العربية وجمهورية الصومال الديمقراطية ، والمبرمة فى مدينة أبو ظبى بتاريخ ٣ مايو ١٩٨١م.

المادة الثانية

للاتفاقية قوة القانون فى قطر جمهورية الصومال الديمقراطية ويعمل بها من تاريخ تبادل وثائق التصديق.

المادة الثالثة

ينفذ هذا المرسوم اعتبارا منتاريخ توقيع جمهورية الصومال الديمقراطية، وبشر فى الجريدة الرسمية للجمهورية .

رئيس ج. ص. د.

محمد سياد برى

Xeerka Madaxweynaha JDS. Lambar 33 taariikh 26 Maajo 1982 Meelmarin Heshiiska dhexmaray JDS, iyo Sanduuqa Kuweyt ee Horumarinta dhaqaalaha Carabta, kuna saabsan Mashruuca Kordhinta Xoogga Korontada Muqdisho.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qodobka 67aad, Xubintiisa 5aad iyo Qodobka 82aad, xubintiisa 4aad ee Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Sharciga tirsigiisu yahay, taariikh, ee Golaha Shacbiga ku oggolaaday Heshiiska ujeedada ku qoran;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in Heshiiska la meel mariyo.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

(Qod. 1aad)

Waxaa la meelmariyay Heshiiska dhexmaray JDS. iyo Sanduuqa Kuweyt ee Horumarinta Dhaqaalaha Carabta, kuna saabsan Mashruuca Kordhinta Xoogga Korontada Muqdisho.

(Qod 2aad)

Heshiiskan wuxuu ku yeelanayaa Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya astaan Sharci ah, waxaana lagu dhaqmayaa marka la is dhaafsodo Waraaqaha meelmarinta.

(Qod. 3aad)

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 26 Mag. 1982

MADAXWEYNAHA JDS

مرسوم رئيس ج. ص. د. رقم ٣٥ بتاريخ ٢٦ مايو ١٩٨٢
التصديق على اتفاقية بين جمهورية الصومال الديمقراطيةوالصندوق العربى للازماء الاقتصادى والاجتماعى للمساهمة فى تمويل مشروع مياه مقديشو الثانى .

رئيس جمهورية الصومال الديمقراطية

بعد الاطلاع على الفقرة الخامسة من المادة ٦٧ والفقرة الرابعة المادة ٨٢ من الدستور.

وعلى القانون رقم ١٧ بتاريخ ———— والذى بموجبه وافق مجلس الشعب على الاتفاقية المبنية أعلاه .

ونظرا للضرورة الداعية الى التصديق على الاتفاقية السالفة الذكر.

يرسم

بما هو آت :

المادة الاولى

تم التصديق على اتفاقية القرض المبرمة بين جمهورية الصومال الديمقراطية وصندوق الكويت للتنمية الاقتصادية العربية للمساهمة فى تمويل مشروع زيادة الطاقة الكهربائية فى مقديشو ، والموقع عليها فى مدينة الكويت بتاريخ ٨ — ٣ — ١٩٨٢م.

المادة الثانية

للاتفاقية قوة القانون فى قطر جمهورية الصومال الديمقراطية ، ويعمل بها ابتداء من تاريخ تبادل وثائق التصديق.

المادة الثالثة

ينفذ هذا المرسوم ابتداء من تاريخ توقيع رئيس الجمهورية عليه وينشر فى وينشر فى الجريدة الرسمية للجمهورية
مقديشو ، فى ٢٦ مايو ١٩٨٢

رئيس ج. ص. د.
محمد سياد برى

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 34 ee 18 Maajo 1982 Billad Maar ah oo Hawlkarnimo lagu Maamuusay Jaalle Dr. Aadan Guuleed Shabeel iyo Jaalle Xasan Ibraahim Abyan.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka J.D.S;
MARKUU ARKAY: Sharciga Lamb.. 65 ee 19 Oktoobar 1970;

MARKUU TIXGELIYEY: Dadaalka dheeraadka ah iyo kartida ay muujiyeen Jaalle Dr. Aadan Guuleed Shbeel iyo Jaalle G/le Xasan Ibraahim Abyan iyagoo ku tilmaaman inay yihiin Jaallayaal daacad ah, hawlkar iyo xilkas ah.

MARKUU TIGELIYEY: Inay lagama maarmaan tahay in dadka ku shaqeeyo hawlkarniuo, kana qeyb qaata Dhismaha Dalka iyagoo muujinaaya niyadsami, Kacaannimo, looga reebo raad wax ku ool ah.

WUXUU SOO SAARAY
Xeerka soo socda:

Qodob Keliya

Waxaa Jaallayaasha hoos ku qoran, oo ka qeyb qaatay Dhismaha Dugsiga Sare ee Degmada Hargeysa lagu Maamuusay Billad Maar ah oo Hawlkarnimo:

1. Jaalle Dr. Aadan Guuleed Shabeel
— Guddoomiyaha Guddiga Baarista.

2. Jaalle Gaashaanle Xasan Ibraahim Abyan
— Taliyaha Ciidanka Asluubta GOB.

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa markuu Madaxweynaha J.D.S. soo saxiixo.

Muqdisho, 18 Mag. 1982

MADAXWEYNAHA JDS
(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

Xeerka Madaxweynaha JDS Lambar 35 taariikh 26 Maajo 1982 meelmarinta Heshiiska dhexmaray JDS iyo Sanduuqa Carabta ee Horumarinta Dhaqaalaha iyo Bulshada, kuna saabsan maalgelinta Mashruuca Biyaha Xamar ee Marxaladda Labaad.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 67aad, xubintiisa 5aad iyo Qod. 82aad, xubintiisa 4aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga tirsigiisu yahay, Taariikh ee Golaha Shacbigu ku oggolaaday Heshiiska ujeeddada ku qoran;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in Heshiiskan la meelmariyo.

WUXUU SOO SAARAY

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la meelmariyey Heshiiska dhexmaray JDS iyo Sanduuqa Carabta ee Horumarinta Dhaqaalaha iyo Bulshada. kuna saabsan Maalgelinta Mashruuca Biyaha Xamar ee Marxaladda Labaad.

Qod 2aad

Heshiiskan wuxuu ku yeelanayaa Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya astaan Sharci ah, waxaana lagu dhaqmayaa marka la is dhaafsado Waraaqaha meelmarinta.

Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuryadda Dimoqraadiga Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 26 Mag. 1982

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

مرسوم رئيس ج.ص.د. رقم ٣٥ بتاريخ ٢٦ مايو ١٩٨٢م .
التصديق على اتفاقية بين جمهورية الصومال الديمقراطية والصندوق العربى للازماء الاقتصادى والاجتماعى للمساهمة فى تمويل مشروع مياه مقديشو الثانى .

رئيس الجمهورية

بعد الاطلاع على الفقرة الخامسة من المادة ٦٧ والفقرة الرابعة من المادة ٨٢ من الدستور .

وعلى القانون رقم بتاريخ ١٨ والذى بموجبه وافق مجلس الشعب على الاتفاقية المذكورة اعلاه .

ونظرا للضرورة الداعية الى التصديق على الاتفاقية السالفة الذكر.

يرسم

بما هى آت : —

المادة الاولى

تم التصديق على اتفاقية القرض المبرمة بين جمهورية الصومال الديمقراطية والصندوق العربى للانماء الاقتصادى والاجتماعى للمساهمة فى تمويل مشروع مياه مقديشو الثانى والموقع عليها ع مدينة الكويت بتارخ ٢٦ — ١٢ — ١٩٨١م.

المادة الثانية

للاتفاقية قوة القانون يقطر جمهورية الصومال الديمقراطية ويعمل بها من تاريخ تبادل وثائق التصديق .

المادة الثالثة

ينفذ هذا المرسوم ابتداء من تاريخ توقيع رئيس الجمهورية عليه وينشر فى الجريدة الرسمية للجمهورية —

مقديشو فى ٢٦ مايو ١٩٨٢م.

رئيس ج.ص.م
محمد سياد برى

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Buug Keyd dhumay oo Lambarkiisu ahaa 16680 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna qoran Lacag dhan Sh.So. 3.000 uu iska lahaa Faaduma Xaaji Cabdulqaadir sida ku cad Warqadda Lambarkeedu 01362 taariikhdeedu 29.5.82 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaalyeed Laanta Xarunta;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lam. 2 ee 9.9.65.

WAXUU XEERIYEY

In la Baabiiyo (Amortmenta) Buug Keyd Lamb. 16680 oo ku qoran Jaalle Faamumo Xaaji Cabdulqaadir ayna ku jirtoSh.So. 3.000.

WUXuu FARAAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Kowaad u bedelo Jaalle Faadumo Xaaji Cabdulqaadir Buug Keyd ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah kadib markey ka soo wareegto muddo aan ka yareen 30 maalmood maalinta Go,aanka lagu Daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, Haddii inta ka horeysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 29.5.82

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
W.S.Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax.

L. 267